

Convention on the Establishment of the International Organization for **Mediation**

Daabacaad Labada Luuqadood (*Ingiriisi & Soomaali*)



Heshiiska Dhisidda Hay'adda Caalamiga Ah Ee Dhex-Dhexaadinta

Approved by the Council of Ministers of Somalia

January 2026



The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tixraac:XRW/559/2/2026

Tr: 01/2/2026

Ku: Wasaaradda Arrimaha Dibadda & Iskaashiga Caalamiga
Og: Dhammaan Xubnaha Golaha Wasiirrada
Og: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Muqdisho
Muqdisho
Muqdisho

**UJEEDDO: GO'AAN GOLE EE ANSIXINTA "AXDIGA DHISIDDA
HAY'ADDA CAALAMIGA AH EE DHEXDHEXAADINTA**



Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 97^{aad} faqrada (1) iyo (2); Qodobka 99^{aad} farqadaha (a), (b) iyo (e); iyo Qodobka 100^{aad} farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG;

Markuu arkay: Warqadda soo jeedinta Wasaaradda Dekeddaha iyo Gaadiidka Badda ee Summaddeedu tahay

Markuu arkay: MFA/FRS/OFM/18442/2025 kuna taarikheysan 18/11/2025; Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee Summaddiisu tahay SHGW.04.144.01.26 ee 29/01/2026, kuna saabsan "Axdiga Dhisidda Hay'adda Caalamiga ah ee Dhexdhexaadinta" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

Markuu tixgaliyay: Muhiimada axdigani uu u leeyahay sharciiyaynta hay'adda, xoojinta nabadda iyo xasiloona caalamka.

Waxaa uu Meelmariyay:

Qodobka 1^{aad}

Go'aan Gole

Go'aanka shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay SHGW.04.144.01.26 ee 29/01/2026, kuna saabsan "Axdiga Dhisidda Hay'adda Caalamiga ah ee Dhexdhexaadinta" oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

Qodobka 2aad

Farid

In si degdeg ah loogu gudbiyo Golaha shacabka "Axdiga Dhisidda Hay'adda Caalamiga ah ee Dhexdhexaadinta" si ay uga gutaan waajibaadkooda dastuuriga ah.


Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS





Federal Republic of Somalia
Ministry of Foreign Affairs and International Cooperation



Tr: 18/11/2025

Ku: Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS
Og: Golaha Wasiirada Xukuumadda JFS

=Muqdisho=
=Muqdisho=

Ujeedo: Soo Gudbin ku saabsan Axdiga Dhisidda Hay'adda Caalamiga ah ee Dhex-dhexaadinta (IOMed Convention)

Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ee Xukuumadda JFS waxay si xushmad leh halkan idin kugu soo gudbinaysaa Axdiga Dhisidda Hay'adda Caalamiga ah ee Dhex-dhexaadinta (International Organization for Mediation – IOMed), oo lagu saxiixay Hong Kong, ujeeddadiisuna tahay in la abuurro hay'ad caalami ah oo taageerta xallinta khilaafaadka caalamiga ah iyadoo loo maraayo habka dhex-dhexaadinta nabadeed.

Iyadoo la raacaayo talada sharci ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Qaranka, islamarkaana la dhammaystiray dib-u-eegis dhanka sharciga iyo siyaasadda lagu sameeyay axdiga sare ku xusan, ayaa lagu soo jeediyay in loo gudbiyo Golaha Wasiirada si loo meelmariyo, maadaama uu waafaqsan yahay Dastuurka, shuruucda dalka iyo heshiisyada caalamiga ah ay Soomaaliya xubin ka tahay.

Haddaba, Xafiiska sharfta leh, waxaa laga codsanayaa in loo gudbiyo axdigan sare ku xusan Golaha Wasiirada si loo meelmariyo.

Mahadsanidiin.




Xil. Cabdisalaam Cabdi Cali
Wasiirka





THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE STATE ATTORNEY GENERAL

SUMMAD: XGG/395/2025

17/11/2025

Ku: Agaasimaha Golaha Wasiirrada

Muqdisho

Ku: Wasaaradda Arrimaha Dibedda iyo Iskaashiga Caalamiga

Muqdisho

Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS

Muqdisho

**Ujeedo: Talo Bixin Axdiga Dhisidda Hay'adda Caalamiga ah ee Dhexdhexaadinta
(Convention on the Establishment of the International Organization for Mediation)**

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda oo tixraacaya Warqadda SUMMAD: WCAD/XAWSHH/2587/2025 ee ku taariikheysan 09/11/2025, kana soo baxday Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka XFS, Ujeeddaddadeeduna ahayd: SOO-GUDBIN "AXDIGA DHISIDDA HAY'ADDA CAALAMIGA AH EE DHEX-DHEXAADINTA".

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, kadib markii uu darsay nuqulka Axdigan ee ku lifaaqan Warqadda Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka XFS ee sare ku xusan, waxa uu halkan ku soo gudbinayaa falanqeyn ku saabsan Axdiga Dhisidda Hay'adda Caalamiga ah ee Dhex-dhexaadinta, si waafaqsan habraaca Xeer Ra'iisul Wasaare Lr. 125 ee 2023 iyo Xeer L. 18 ee soo baxay 29 Jannaayo 1976:

1. Dulucda iyo Ujeeddada Axdiga:

- 1.1. Axdigan waxa lagu asaasayaa Hay'ada Caalami ah ee dhexdhexaadinta (International Organization for Mediation) taas oo ujeeddadeedu tahay:
- Xallinta khilaafaadka caalamiga si nabad ah, iyadoo la adeegsanayo habka dhexdhexaadinta.
 - Dhiirigelinta xiriirrada saaxibtinimo iyo iskaashiga u dhexeeya dalalka xubnaha ka noqonaya Axdigan.
 - In la siiyo Dawladaha xubnaha ka ah Axdigan ikhtiyaar dhexdhexaadin hufan.

Axdigan waxa lagu saxiixayaa Hong Kong, halkaas oo ay Xarunta Hay'addu ku taalo, waxaana la oggolyahay in dal kasta ama Urur Goboleed (Regional Integration Organization) uu xubin ka noqdo.

2. Nooca Axdiga iyo Dabeecadihiisa:

- 2.1. Axdigan waa Heshiis Darafyo badan (Multilateral Convention) oo ay xubno ka yihiin dawlado badan, waxana lagu dhisayaa mabaadi'da Qaramada Midoobay oo ku salaysan nabadda iyo wada noolaashaha, sida ku cad Qodobbada 3aad iyo 5aad ee Axdigan Hay'addu waxay yeelanaysaa shakhsiyad qaanuuneed ee dawli ah (International Legal Personality), waxayna awood u yeelanaysaa:
- Inay gasho heshiisyo iyo inay hanti yeelato.

- b. Inay dacwad furan karto lana dacween karo.
- c. Inay ka hawlgeli karto dhulalka dawladaha xubnaha ka ah Hay'adda, iyadoo mudnaan iyo xasaanad ku leh (Privileges and Immunities).

Dawladaha ansixiya Axdigan, sida ku cad Qodobbada 24aad iyo 25aad kuma khasbana inay Khilaafaadkooda u gudbiyaan Hay'adda, ka qeyb-galka dhexdhexaadintu waxay ku salaysantahay oggolaasho ikhtiyaari ah (voluntary consent).

3. Xuquuqaha iyo Waajibaadka Axdigan

Dawladda xubin ka noqota Axdigan, waxay yeelandoontaa:

- 3.1. Xaqa cod-bixinta ee Golaha Maamulka (The Governing Council)
- 3.2 Xaqa magacaabista dhexdhexaadiyeyaal u dhashay waddankeeda (Art. 20) iyo;
- 3.3. Xuquuqaha kale ee lagu xusay Axdigan.

Waajibaadka saaran dawladaha xubnaha ka ah Axdigan waxa ka mid ah bixinta Qaaraanka Sanndlaha ah (Art. 47: Annual Contributions), kaas oo lagu xisaabin doono, iyadoo loo eegayo awoodda dhaqaale ee dalka sida uu dhigayo Axdigan.

4. Axdigan xiriirka uu la leeyahay Shuruucda dalka, sida ku cad:

- 4.1. Dastuurka KMG Qodobbada 99^{aad} iyo 100^{aad} ee Dastuurka KMG.
- 4.2. Xeer Ra'iisul-wasaare Lr. 047, Qodobka 1^{aad} faqraddiisa 2^{aad} ee soo baxay 06/12/2018.
- 4.3. Xeer Ra'iisul-wasaare Lr. 125, Qeybta labaad, Qodobka 1^{aad} xarafka (II) ee soo baxay 06/04/2023.
- 4.4. In Axdigan aanu ka hor-imaaneyn Heshiisyada Caalamiga ah ee Dawladda Soomaaliya ay xubinta ka tahay.

Gebo-gebo:

Xafiiska Garyaqaanka Guud oo gudanaya waajibaadka ku xusan Qodobka 3^{aad} faqraddiisa 3^{aad} ee Xeer L. 18 ee soo baxay 29 Jannaayo 1976, waxa uu ku talinyaa in loo gudbiyo Golaha Wasiirrada Nuqulka Axdigan ee ku lifaaqan warqaddan maadaama Xafiiska Garyaqaanku uu ku sameeyey saxitaan iyo toosin Nuqulka Af-Soomaaliga si waafaqsan Nuqulka Ingiriiska, isla markaana aanu ka hor-imaanayn Dastuurka, Shuruucda kale iyo Heshiisyada Caalamiga ee JFS xubin ka tahay, ka dib marka la dhammeystiro habraaca uu tilmaamayo Qeybta Labaad ee Xeer Ra'iisul-wasaare Lr. 125, Qodobka 1^{aad}, xarafka (ii) ee soo baxay 06/04/2023 iyo Qodobka 59aad faqraddiisa 2aad ee Xeer Ra'iisul-wasaare Lr. 174, soona baxay 15/02/2025, si loogu gudbiyo Golaha Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, maadaama Axdigan Dawladaha xubnaha ka ah ay uga dhalanayaan xuquuqo iyo waajibaadyo kala duwan marka ay Ansixiyaan Axdigan.

FG: Halkaan waxaa ku lifaaqan Warqadda Wasaaradda iyo nuqulka Axdiga.

Salaan qadarin leh

Qareen: Axmed Faarax Axmed
Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dawladda





Federal Republic of Somalia
Ministry of Justice and Constitutional Affairs
Office of Director Legislations and Agreements Department

SUMMAD: WCAD/XAWSHH/2589/2025

Tr. 09/11/2025

Mudane Garyaqaan,

UJEEDDO: SOO-GUDBIN “AXDIGA DHISIDDA HAY’ADDA CAALAMIGA AH EE DHEXDHEXAADINTA”

Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka waxaa soo gaaray “Axdiga Dhisidda Hay’adda Caalamiga ah ee Dhexdhexaadinta” oo ay noo soo dirtay Wasaaradda Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah, Wasaaradduna waxay ka gudatay waajibaadkeedii sharci.

Wasaaradda Caddaaladdu waxay caddeyneysaa in qodobbada heshiiska sare ku xusan aysan ka hor-imaanayn Dastuurka KMG ee JFS iyo shuruucda kale ee dalka.

Haddaba, waxaan Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda ka codsanaynaa, inuu ka guto waajibaadkiisa kaga aadan heshiisyada, si loo waafajiyo habraaca ansixinta heshiisyada ee Xukuumadda JFS.

Wada-shaqeyn wacan.



Mudane Xasan Axmed
**Agaasimaha Waaxda Sharciyada iyo Heshiisyada,
Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka**

Garyaqaanka Guud ee Dawladda
Og: Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka
Og: Xoghayaha Joogtada ah ee Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka
Og: Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka
Og: Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka
Og: Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arr. Dastuurka

=Muqdisho=
=Muqdisho=
=Muqdisho=
=Muqdisho=
=Muqdisho=
=Muqdisho=

Dr. Axmed, Sabriye, Daxan
11/11/2025

AXDIGA DHISIDDA HAY'ADDA CAALAMIGA AH EE DHEXDHEXAADINTA

Hordhac

Dawladaha Dhinaca ka ah Axdigan:

IYAGOO AQOONSAN qiimaha ay leedahay dhexdhexaadintu si loo horumariyo nabadda iyo horumarka, looguna dhiirri-geliyo xiriir saaxiibtinimo iyo iskaashi Dawladaha dhexdooda ah,

IYAGOO KU HANUUNSAN ujeedooyinka iyo mabaa'di' da ku xusan Axdiga Qarammada Midoobay,

IYAGOO GAROWSAN baahida loo qabo dabacsanaan ku saabsan xallinta khilaafaadka caalamiga ah iyo faa'iidooyinka muuqda ee dhexdhexaadinta iyo isticmaalkeeda sii kordhaya,

IYAGOO TIXGELINAYA muhiimadda ay u leedahay bulshada caalamka in la dhiso hay'ad dawladeed oo joogto ah oo heer caalami ah si ay u xalliso khilaafaadka caalamiga ah iyadoo loo marayo habka dhexdhexaadinta,

IYAGOO XUSUUSAN Bayaanka Wadajirka ah ee ku saabsan Dhisidda Mustaqbalka ee Hay'adda Caalamiga ah ee Dhexdhexaadinta, kaasoo ah tillaabadii ugu horraysay ee lagu aasaasayo hay'ad caalami ah oo dhexdhexaadin ah,

IYAGOO RUMEYSAN in dhisidda Hay'adda Caalamiga ah ee Dhexdhexaadintu ay dhiirri-gelin doonto xallinta nabadeed iyo saaxiibtinimo ee khilaafaadka caalamiga ah, isla markaana ay gacan ka geysan doonto dhisidda xiriir caalami ah oo isu dheelli-tiran,

IYAGOO AAMINSAN in dhisidda Hay'adda Caalamiga ah ee Dhexdhexaadintu ay horumarin doonto isticmaalka iyo kobcinta dhexdhexaadinta, isla markaana ay noqon doonto dhammeystir waxtar leh oo lagu xoojinayo hababka kale ee caalamiga ah ee xallinta khilaafaadka,

IYAGOO MAR KALE ADKAYNAYA in aan Dawlad heshiiskan ku biirtay kaliya sababo la xiriira saxiix, ansixin, aqbalid ama ka-mid-noqoshada Axdigan, loona tixgelin doonin inay waajib ku tahay inay oggolaato in khilaaf gaar ah loo gudbiyo dhexdhexaadin la'aanteed oggolaanshaheeda,

Waxay ku heshiiyeen sida soo socota:

CUTUBKA KOWAAD

Dhisidda Hay'adda Caalamiga ah ee Dhexdhexaadinta

Qodobka 1^{aad}: Dhisid

Hay'adda Caalamiga ah ee Dhexdhexaadinta (halkan iyo wixii ka dambeeya loogu yeeridoono "Hay'adda") ayaa halkan lagu dhisay iyadoo ku shaqeyn doonta si waafaqsan qodobbada Axdigan.

Qodobka 2^{aad}: Qeexitaanno:

Ujeedooyinka Axdigan awgood:

- a. "Dhexdhexaadin" waxay ka dhigan tahay hab, ha lagu magacaabo ereyga dhexdhexaadin (mediation), isu keenid (conciliation), ama erayo kale oo la mid ah, kaasoo dhinacyadu isku dayaan inay si ikhtiyaari ah u gaaraan heshiis nabadeed oo la isla oggol yahay oo lagu xallinayo khilaafkooda, iyadoo gacan laga helayo qof ama dad saddexaad (dhexdhexaadiye) kuwaasoo fududeyn kara xal u dhexeeya dhinacyada balse aan awood u lahayn in ay ku khasbaan dhinacyada xalkaas.
- b. "Dawladaha Dhinaca ka ah Heshiiska" (Contracting States) waxay yihiin dawladaha oggolaaday in ay u-hoggaansamaan Axdigan oo uu u dhaqan galay.

- c. “Dawladaha Aan Heshiiskan dhinaca ka ahayn” (Non-Contracting States) waxay yihiin dawladaha aan Axdigan u dhaqan-gelin.
- d. “Dhinacyadu” (parties) waxay ka dhigan yihiin dhammaan dhinacyada ku lugta leh khilaafka, halka “Dhinac” (party) uu yahay mid kasta oo ka mid ah.
- e. “Dawlad Saddexaad” (a third State) waxa loola jeedaa dawlad ku lug leh khilaaf ay dawlado kale u gudbiyeen Hay’adda.
- f. “Hay’ad Caalami ah” (international organization) waxay ka dhigan tahay hay’ad dawladeed oo caalami ah (intergovernmental organization).

Qodobka 3^{aad}: Ujeeddooyinka iyo Himmillooyinka

Ujeeddooyinka iyo himmillooyinka Hay’addu waa in ay dhiirri-geliso lana fududeyso xallinta nabadeed ee khilaafaadka caalamiga ah, isla markaana ay horumariso xiriir saaxiibtinimo iyo iskaashi Dawladaha dhexdooda ah iyadoo loo marayo habka dhexdhexaadinta.

Qodobka 4^{aad}: Mabaadi’da Hay’adda

Hay’adda iyo Dawladaha Heshiiska ku jira, iyadoo raacaya ujeeddooyinka iyo himmillooyinka lagu sheegay Qodobka 3aad waxay ku dhaqmi doonaan mabaadi’da soo socda:

- a. Ixtiraamka madax-bannaanida iyo midnimada dhuleed, sinnaanta, fara-gelin la’aanta arrimaha gudaha ee Dawladaha, iyo u-hoggaansanaanta xeerka caalamiga ah ee sharciga (international rule of law);
- b. Dammaanad-qaadka xorriyadda dhinacyada iyo xuquuqdooda ay ugu doortaan habka ay ku xallinayaan khilaafkooda;
- c. Daacadnimo iyo ruux iskaashi oo lagu raadinayo xal nabadeed iyo saaxiibtinimo oo lagu xallinayo khilaafaadka caalamiga ah; iyo
- d. Dammaanad qaadidda jawi eex-la’aan ah, dhexdhexaad ah, iyo cadaalad ah oo kor u qaada hab dabacsan oo hufan oo lagu gaaro xallinta nabadeed ee khilaafaadka iyada oo loo marayo dhexdhexaadin.

Qodobka 5^{aad}: Shaqooyinka

Iyadoo la raacayo mabda’adka iyo ujeeddooyinka lagu sheegay Axdigan, Hay’addu waxay yeelan doontaa hawlaha soo socda:

- a. Inay bixiso adeegyo dhexdhexaadin ah si loo xalliyo khilaafaadka caalamiga ah;
- b. Inay dhiirrigeliso isticmaalka dhexdhexaadinta ee xallinta khilaafaadka, horumarinta dhaqanka dhexdhexaadinta, iyo sahminta iyo kor u qaadista hababka ugu wanaagsan ee dhexdhexaadinta;
- c. Inay abaabusho goleyaal iyo shirar heer caalami, gobol, qaran iyo mid deegaan oo ku saabsan dhexdhexaadinta, iyada oo dhisaysa madal isgaarsiineed iyo wadaagista xogta;
- d. Inay kor u qaaddo iskaashi lagu dhisayo awoodaha (capacity building) ee dhinaca dhexdhexaadinta, iyadoo aqoonsan oo mudnaan siineysa baahiyaha dalalka soo koraya; iyo
- e. Inay la shaqeyso oo xiriir la sameyso hay’adaha kale ee caalamiga ah iyo kuwa xallinta khilaafaadka.

Qodobka 6^{aad}: Xaaladda Sharciyeed

1. Hay’addu waxaa la siiyey aqoonsi sharciga caalamiga ah (international legal personality) waxayna yeelan doontaa awood sharci oo dhammaystiran si ay u qabato hawlaha soo socda:
 - a. Inay gasho heshiisyo iyo qandaraasyo (to contract);
 - b. Inay iibsato ama iska iibiso hanti maguurta ah iyo hanti guurta ah (immovable and movable property);

- c. Inay qaaddo tallaabo sharci ah, oo ay ku jirto bilaabidda iyo ka jawaabidda dacwado sharci ah; iyo
 - d. Inay qaaddo tallaabo kasta oo kale oo lagama maarmaan ama waxtar u ah ujeeddooyinkeeda, himmillooyinkeeda iyo hawlaheeda.
2. Hay'addu waxay awood u yeelan doontaa inay ku fuliso shaqooyinkeeda iyo awoodaheeda, sida ku cad Axdigan, dhulka Dawlad kasta oo Heshiiska qeyb ka ah (Contracting State) iyo heshiis gaar ah oo lagu gaaro, dhulka dawlad kale.

Qodobka 7^{aad}: Xubinnimada

1. Hay'addu waxay u furnaan doontaa dhammaan Dawladaha iyo Ururrada Isdhexgalka Goboleed (regional integration organizations) ee doonaya inay xubin ka noqdaan, iyadoo ujeeddadeedu tahay mid furan oo isu keenid ah.
2. Dawladaha saxiixay ama taageeray Bayaanka Wadajirka ah ee ku saabsan Dhisidda Mustaqbalka ee Hay'adda Caalamiga ah ee Dhexdhexaadinta waxay xaq u yeelan doonaan inay noqdaan Xubnaha Asaasayaasha (Founding Members) haddii ay oggolaadaan in ay u-hogaansamaan Axdigan muddo shan sano gudahood ah laga bilaabo taariikhda uu Axdigan dhaqan galo.
3. Dawladaha kale waxay xaq u yeelan doonaan inay noqdaan Xubnaha Asaasayaasha haddii ay oggolaadaan in ay u-hogaansamaan Axdigan muddo laba sano gudahood ah laga bilaabo taariikhda uu Axdigan dhaqan galo.

Qodobka 8^{aad}: Xarunta Dhexe

1. Xarunta Dhexe ee Hay'addu waxay ahaan doontaa Gobolka Maamul ee Gaarka ah ee Hong Kong ee Jamhuuriyadda Shacbiga ee Shiinaha (Hong Kong Special Administrative Region of the People's Republic of China).
2. Hay'addu waxay meelaha kale ka samayn kartaa xafiisyo goboleed sida ay lagama maarmaan u aragto.

Qodobka 9^{aad}: Qaab-dhismeedka

1. Hay'addu waxay yeelan doontaa Golaha Maamulka (Governing Council) iyo Xoghayn (Secretariat).
2. Hay'addu waxay sii haysan doontaa Liisaska Dhexdhexaadiyeyaasha (Panels of Mediators).
3. Hay'addu waxay dhisi kartaa hay'ado hoosaadyo ama goleyaal lataliye (subsidiary institutions or advisory bodies) sida ay lagama maarmaan u aragto si ay u fuliso ujeeddooyinkeeda, himmillooyinkeeda iyo shaqooyinkeeda.

Cutubka Labaad

Golaha Maamulka (The Governing Council)

Qodobka 10^{aad}: Qodob Guud

Golaha Maamulka waa hay'adda go'aan-qaadashada, wuxuuna mas'uul ka noqon doonaa dejinta siyaasadaha iyo dhisidda istiraatiijiyadda guud ee Hay'adda.

Qodobka 11^{aad}: Dhismaha

1. Golaha Maamulka wuxuu ka koobnaan doonaa hal wakiil oo ka socda Dawlad kasta oo Heshiiska qeyb ka ah (Contracting State). Wakiil kale oo ay magacowdo dawladdu wuxuu u dhaqmi karaa beddel ahaan haddii wakiilka rasmiga ah uusan ka soo qeyb-geli karin kulan ama uu awoodi waayo inuu shaqadiisa fuliyo.
2. Inta lagu guda-jiro kulankiisa sanadlaha ah, Golaha Maamulka wuxuu dooran doonaa Guddoomiyaha (Chairperson) oo xilka haya ilaa doorashada Guddoomiyaha xiga. Waxaa sidoo kale la dooran karaa hal ama in ka badan Guddomiye Ku-xigeenno (Vice Chairpersons), kuwaasoo muddada xil-hayntu ay la mid tahay tan Guddoomiyaha.

Qodobka 12^{aad}: Awoodaha iyo Shaqooyinka

1. Iyadoo aan wax loo dhimeyn awoodaha iyo shaqooyinka kale ee lagu siiyey qodobbada kale ee Axdigan, Golaha Maamulka wuxuu yeelan doonaa awoodahan iyo shaqooyinkan soo socda:
 - a. Inuu sameeysto xeerarkiisa hab-raaca (rules of procedure);
 - b. Inuu ansixiyo xeerarka maamulka iyo maaliyadda ee Hay'adda;
 - c. Inuu ansixiyo hab-raaca xulashada iyo magacaabista Xoghayaha Guud (Secretary-General) iyo Ku-xigeennada Xoghayaha Guud (Deputy Secretaries-General);
 - d. Inuu ansixiyo miisaaniyadda sanadlaha ah ee dakhliga iyo kharashaadka Hay'adda;
 - e. Inuu ansixiyo xeerarka hab-raaca ee furitaanka hab-raacyada dhexdhexaadinta;
 - f. Inuu ansixiyo xeerarka hab-raaca ee habka dhexdhexaadinta;
 - g. Inuu ansixiyo xeerka anshaxa ee dhexdhexaadiyeyaasha (code of conduct for mediators);
 - h. Inuu dib u eego oo ansixiyo warbixinta sanadlaha ah ee ku saabsan hawl-galka Hay'adda;
 - i. Inuu magacaabo Xoghayaha Guud iyo Ku-xigeennada Xoghayaha Guud;
 - j. Inuu go'aamiyo xaaladaha iyo shuruudaha shaqo ee Xoghayaha Guud iyo Ku-xigeennadiisa; iyo
 - k. Inuu dhiso hay'ado hoosaadyo ama goleyaal lataliye oo Hay'adda ah.
2. Golaha Maamulka wuxuu sidoo kale fulin doonaa awood kasta ama hawl kasta oo kale oo uu go'aansado inay lagama maarmaan u tahay hirgelinta qodobbada Axdigan.
3. Golaha Maamulka ma faragelin doono wax hab-raac dhexdhexaadin ah oo socda sida uu qabo Axdigan, sidoo kalena kama qeyb qaadan doono heshiis kasta oo lagu soo gabagabeeyo khilaaf dhinacyada u dhexeeya.

Qodobka 13^{aad}: Kulamada

1. Golaha Maamulka wuxuu yeelan doonaa kulan sanadle ah iyo kulamo kale oo uu go'aamiyo Golaha Maamulka ama uu isugu yeero Guddoomiyaha ama Xoghayaha Guud (Secretary-General) marka ay codsadaan ugu yaraan saddex xubnood oo ka tirsan Golaha Maamulka.
2. Kulamadu waxay ka dhici doonaan Xarunta Dhexe ee Hay'adda, ilaa iyo inta Golaha Maamulka uu si kale u go'aansado.
3. Tirada ugu yar ee loo baahan yahay (quorum) si kulan Golaha Maamulka ahi u ansaxo waa in ay joogaan inta badan xubnihiisa.
4. Golaha Maamulka wuxuu, go'aan ay taageeraan laba-meelood saddex meelood (two-thirds majority) ee xubnihiisa, oggolaan karaa in xubnaha lagu daro kulamada iyadoo adeegsanaya fiidiyowga khadka tooska ah (videoconference) ama habab kale oo elektaroonik ah (virtual means).

Qodobka 14^{aad}: Go'aan Qaadasho

1. Golaha Maamulka wuxuu, intii ugu macquulsan, ku shaqayn doonaa saldhigga is-afgarad guud (consensus).
2. Haddii aan la gaarin is-afgarad guud arrin gaar ah ka dib marka la sameeyo dadaal kasta oo suurtagal ah, marka laga reebo xaaladaha si gaar ah loogu qeexay Axdigan ama hab-raaca xulashada iyo magacaabista Xoghayaha Guud iyo Ku-xigeennadiisa (Deputy Secretaries-General), Golaha Maamulka wuxuu u gudbi doonaa inuu ku go'aamiyo arrintaas cod aqlabiyad ah oo ka timaadda xubnaha joogta ah ee coddaynaya.
Go'aannada lagu xusay faqrado-hoosaadyada (a) ilaa (g) iyo (k) ee faqradda 1 ee Qodobka 12 waa in lagu ansixiyaa aqlabiyad saddex-meelood labo meelood ah oo xubnaha Golaha Maamulka ka mid ah.
3. Xubin kasta oo ka tirsan Golaha Maamulka wuxuu yeelan doonaa hal cod.

Xoghaynta (The Secretariat)

Qodobka 15^{aad}: Dhismaha

1. Xoghayntu waxay ka koobnaan doontaa Xoghayaha Guud (Secretary-General), hal ama in ka badan Ku-xigeenno Xoghaye Guud (Deputy Secretaries-General), iyo saraakiil iyo shaqaale kale oo la arko inay lagama-maarmaan yihiin.
2. Xoghayaha Guud waxaa magacaabi doona Golaha Maamulka, isagoo laga xulanayo muwaadiniinta Dawladaha Heshiiska ku jira (Contracting States).
3. Hal ama in ka badan Ku-xigeenno Xoghaye Guud waxaa magacaabi doona Golaha Maamulka, iyadoo lagu saleynayo talo-soo-jeedinta Xoghayaha Guud, lagana xulanayo muwaadiniinta Dawladaha Heshiiska ku jira.

Qodobka 16^{aad}: Shaqooyinka

1. Xoghayntu waxay mas'uul ka tahay hirgelinta go'aannada uu qaato Golaha Maamulka (Governing Council).
2. Xoghayntu waxay diyaarin doontaa miisaaniyadda sanadlaha ah ee dakhliga iyo kharashaadka, iyo sidoo kale warbixinta sanadlaha ah ee ku saabsan hawlaha Hay'adda, si loogu gudbiyo Golaha Maamulka si uu u eego oo u ansixiyo.
3. Xoghayntu waxay dhisi doontaa marinno isgaarsiineed oo rasmi ah oo lala yeesho Dawladaha Heshiiska ku jira (Contracting States).

Qodobka 17^{aad}: Xoghayaha Guud

1. Xoghayaha Guud waa wakiilka sharciyeed iyo sarkaalka ugu sarreeya ee Hay'adda, wuxuuna mas'uul ka yahay maamulka Hay'adda, oo ay ku jirto magacaabista saraakiisha, si waafaqsan qodobbada Axdigan iyo xeerarka iyo nidaamyada uu ansixiyey Golaha Maamulka.
2. Xoghayaha Guud waxaa loo magacaabi doonaa muddo shan sano ah (five years term) waxaana loo oggolaan doonaa in hal mar dib loogu magacaabo (re-appointment once).
3. Xoghayaha Guud wuxuu ka qeyb-geli karaa kulamada Golaha Maamulka, balse ma laha xuquuq cod-bixin (no vote).
4. Xoghayaha Guud wuxuu qaban doonaa shaqada Diiwaan-geliyaha (Registrar) wuxuuna awood u yeelan doonaa inuu xaqiijiyo (authenticate) warbixinaha dhexdhexaadinta ama heshiisyada lagu gaaro sida uu dhigayo Axdigan, iyo inuu caddeeyo nuqullo rasmi ah (certify copies thereof).
5. Xoghayaha Guud wuxuu u shaqayn karaa sidii hay'ad magacaabis ah (appointing authority) sida ku cad xeerarka la ansixiyey ee Axdigan ama xeerar kale oo dhexdhexaadin ah, haddii sidaas lagu qeexo qodobka dhexdhexaadinta, heshiis dambe oo dhinacyadu gaaraan, ama si kale.
6. Xoghayaha Guud wuxuu maamuli doonaa isgaarsiinta lala yeesho Dawladaha Heshiiska ku jira wuxuuna kor u qaadi doonaa sumcadda iyo muuqaalka Hay'adda heer caalami ah.
7. Xafiiska Xoghayaha Guud lama jaanqaadi karo qabashada xil siyaasadeed. Sidoo kale, Xoghayaha Guud iyo Ku-xigeen kasta uma bannaana inay qabtaan shaqo kale ama ay ku hawl-galaan hawlo kale, marka laga reebo haddii Golaha Maamulka uu si gaar ah u oggolaado.

Qodobka 18^{aad}: Dabeecadda Caalamiga ah

1. Xoghayaha Guud, saraakiisha iyo shaqaalaha Xoghaynta, marka ay gudanayaan xilalkooda, waxay waajibkooda u hayaan oo keliya Hay'adda, mana jirto awood kale oo ay u adeegayaan.
2. Dawlad kasta oo Heshiiska qeyb ka ah waa inay ixtiraamtaa dabeecadda caalamiga ah ee waajibkan, isla markaana waa inay ka fogaataa isku day kasta oo lagu saameynayo ama lagu faragelinayo shaqadooda ay ku gudanayaan xilalkooda.

Cutubka Afaraad

Guddiyada Dhexdhexaadiyeyaasha (Panels of Mediators)

Qodobka 19: Ilaalinta iyo Joogteynta Guddiyada Dhexdhexaadiyeyaasha

1. Hay'addu waxay sii haysan doontaa laba Guddi oo Dhexdhexaadiyeyaal ah (Panels of Mediators): mid loogu talagalay dhexdhexaadinta khilaafaadka lagu qeexay Qodobka 25 (halkan iyo wixii ka dambeeya loogu yeerayo Guddiga Dhexdhexaadiyeyaasha Dawlad-Dawlad— Panel of State-to-State Mediators), iyo mid kale oo loogu talagalay dhexdhexaadinta khilaafaadka kale ee

lagu sheegay Qodobbada 27 iyo 28 (halkan iyo wixii ka dambeeya loogu yeerayo Guddiga Guud ee Dhexdhexaadiyeyaasha — *General Panel of Mediators*).

2. Guddiyadu waxay ka koobnaan doonaan shakhsiyaad aqoon iyo xirfad sare leh oo lagu magacaabay sida hoos lagu sheegay, kana go'an inay xilkaas u adeegaan.
3. Hay'addu waxay dhisi kartaa Guddiyo Dhexdhexaadiyeyaal oo gaar ah (special Panels) sida ay lagama-maarmaan u aragto.

Qodobka 20^{aad}: Magacaabista ay sameeyaan Dawladaha Heshiiska ku jira

1. Dawlad kasta oo Heshiiska qeyb ka ah (Contracting State) waxay magacaabi kartaa ugu badnaan shan (5) qof oo muwaadiniinteeda ka mid ah si ay ugu biiraan Guddiga Dhexdhexaadiyeyaasha Dawlad- Dawlad (Panel of State-to-State Mediators), iyo ugu badnaan labaatan (20) qof oo muwaadiniinteeda ah si ay ugu biiraan Guddiga Guud ee Dhexdhexaadiyeyaasha (General Panel of Mediators).
2. Xubin kasta oo Asaase ah (Founding Member) waxay magacaabi kartaa ugu badnaan toban (10) qof oo dheeraad ah oo muwaadiniinteeda ah si ay ugu biiraan Guddiga Guud ee Dhexdhexaadiyeyaasha.
3. Magacaabista oo dhan waa in la ogeysiyo Xoghayaha Guud (Secretary-General) waxaana ay dhaqan-gelayaan laga bilaabo taariikhda uu ogeysiiskaasi soo gaaro.

Qodobka 21^{aad}: Shuruudaha iyo Xirfadaha

1. Shakhsiyaadka loo magacaabo Guddiyada Dhexdhexaadiyeyaasha waa inay noqdaan dad leh dabeecad wanaagsan oo anshaxeed (high moral character) iyo aqoon la aqoonsan yahay oo gaar ah (recognized competence) oo ku saabsan meelaha gaarka ah ee sida sharciga, ganacsiga, warshadaha, ama maaliyadda — kuwaasoo lagu kalsoonaan karo inay si hufan u qabtaan hawsha dhexdhexaadinta.
2. Marka lagu daro shuruudaha ku xusan faqradda 1, shakhsiyaadka loo magacaabo Guddiga Dhexdhexaadiyeyaasha Dawlad-Dawlad waa inay sidoo kale noqdaan dad leh aqoon iyo karti la hubo oo ku saabsan arrimaha sharciga caalamiga ah (international law), diblomaasiyadda (diplomacy), xiriirka caalamiga ah (international relation), ama arrimaha siyaasadda iyo dhaqaalaha caalamiga ah (international political and economic affairs), isla markaana leh xirfad iyo garasho siyaasadeed oo ballaaran.

Qodobka 22^{aad}: Magacaabista uu sameeyo Golaha Maamulka

1. Golaha Maamulka (Governing Council) wuxuu magacaabi karaa ugu badnaan toban (10) qof si ay ugu biiraan Guddiga Dhexdhexaadiyeyaasha Dawlad- Dawlad (*Panel of State-to-State Mediators*), iyo ugu badnaan labaatan (20) qof si ay ugu biiraan Guddiga Guud ee Dhexdhexaadiyeyaasha (*General Panel of Mediators*).
2. Iyadoo la raacayo Qodobka 21, waxaa si gaar ah loo tixgelin doonaa muhiimadda ay leedahay in la xaqiijiyo matalaadda nidaamyada sharciga waaweyn ee caalamka (principal legal systems), kala-duwanaanshaha juqraafiyeed (geographical diversity), iyo sinnaanta jinsiga (gender balance) guud ahaan Guddiyada marka Golaha Maamulka uu magacaabay xubnaha u adeegaya.

Qodobka 23^{aad}: Muddada Xilka

1. Shakhsiyaadka loo magacaabay Guddiyada Dhexdhexaadiyeyaasha (Panels) waxay xilka hayn doonaan muddo shan sano ah (five years), taasoo dib loo cusboonaysiin karo.
2. Haddii uu dhinto, iscasilo ama laga laabto magacaabista qof loo magacaabay Guddiga, Dawladaha Heshiiska ku jira ama Golaha Maamulka ee magacaabay qofkaas waxay xaq u leeyihiin inay magacaabaan qof kale si uu xilka u hayo inta ka dhiman muddada.

Cutubka Shanaad Baaxadda Kiisaska (Scope of Cases)

Qodobka 24^{aad}: Qodob Guud

1. Hay'addu waxay bixin doontaa adeegyo dhexdhexaadin ah oo lagu xallinayo khilaafaadka caalamiga ah ee hoos ku xusan, kuwaasoo dhinacyadu si wadajir ah ugu heshiiyaan in loo gudbiyo dhexdhexaadin, xitaa ka hor ama ka dib marka khilaafka uu soo baxo:
 - a. Khilaafaadka u dhexeeya Dawladaha;
 - b. Khilaafaadka u dhexeeya Dawlad iyo muwaadin ka tirsan Dawlad kale; iyo
 - c. Khilaafaadka ganacsi ee caalami ah ee u dhexeeya dhinacyo gaar loo leeyahay.
2. Oggolaanshaha dhexdhexaadinta waxaa dhinac kasta ka laaban karaa si keliya, waqti kasta inta lagu jiro hab-raaca dhexdhexaadinta, marka laga reebo haddii dhinacyadu si kale u heshiiyaan ama haddii heshiis ama axdi khuseeya uu si kale u dhigo.

Qodobka 25^{aad}: Khilaafaadka u Dhexeeya Dawladaha

1. Hay'addu waxay bixin doontaa adeegyo dhexdhexaadin ah marka ay codsadaan Dawladaha Heshiiska ku jira (Contracting States) ee ku heshiia dhexdhexaadin ku saabsan khilaafaadka sharci ama xaqiiqo, khilaafaadka aragtiyeed, ama arrimo kale oo khuseeya labada dawladdood.
2. Hay'addu sidoo kale waxay bixin kartaa adeegyo dhexdhexaadin ah Dawladaha aan Heshiiska ahayn (Non-Contracting States) ama hay'adaha caalamiga ah haddii ay doonayaan in ay khilaafkooda u gudbiyaan Hay'adda, iyadoo lagu saleynayo xeerar uu Golaha Maamulka ansixiyo.
3. Hay'addu ma bixin doonto adeegyo dhexdhexaadin ah Dawlad kasta oo ku saabsan khilaafaad ay Dawladdaas si gaar ah uga reebtay dhexdhexaadinta iyadoo raacaysa Qodobka 29, sida khilaafaadka ku saabsan madax-bannaanida dhuleed (territorial sovereignty), kala-soocidda badaha (maritime delimitation), danaha badeed (maritime interests), ama arrimo kale oo Dawladdaasi u aragto inaanay ku habboonayn dhexdhexaadin.

Qodobka 26^{aad}: Khilaafaadka ay ku Lug Yeelato Dawlad Saddexaad

1. Marka uu jiro khilaaf ay Dawladdo soo gudbiyeen oo ay ku lug leedahay Dawlad saddexaad, Hay'addu ma bixin doonto adeegyo dhexdhexaadin ah khilaafkaas ilaa ay Dawladda saddexaad ee khuseysa bixiso oggolaansho hore.
2. Ujeedooyinka faqradda 1 awgeed, Dawladaha ku lugta leh khilaafka waa inay Hay'adda ku wargeliyaan xaaladdaas marka ay bilaabayaan hab-raaca dhexdhexaadinta si waafaqsan Axdigan. Sidoo kale, Hay'addu waxaa oggolaan karta in ay xogtan ka hesho Dawladda saddexaad.

Qodobka 27^{aad}: Khilaafaadka u Dhexeeya Dawlad iyo Muwaadin Dawlad Kale

1. Hay'addu waxay bixin doontaa adeegyo dhexdhexaadin ah oo ku saabsan khilaafaadka ganacsi ama maalgashi ee u dhexeeya Dawlad Heshiiska ku jirta (Contracting State) iyo muwaadin Dawlad kale.
2. Hay'addu sidoo kale waxay bixin kartaa adeegyo dhexdhexaadin ah oo ku saabsan khilaafaadka ganacsi ama maalgashi ee ay ku lug leeyihiin Dawladdo aan Heshiiska ahayn (Non-Contracting States) ama hay'ado caalami ah, haddii dhinacyadu ku heshiiyaan in ay khilaafkooda u gudbiyaan Hay'adda, iyadoo lagu saleynayo shuruudo uu ansixiyo Golaha Maamulka.
3. Ujeedooyinka Axdigan awgood, marka la xuso Dawlad ama hay'ad caalami ah, waxaa sidoo kale loola jeedaa laan, qeybo-hoosaad, ama hay'ad ka tirsan Dawladda, oo Dawladdaas u magacowday Hay'adda, ama hay'ad ka tirsan hay'ad caalami ah.
4. Oggolaanshaha ay bixiso laan ama hay'ad ka tirsan Dawlad Heshiiska ku jirta waxay u baahan doontaa ansixinta Dawladdaas, ilaa iyo inta Dawladdaas ay si rasmi ah Hay'adda ugu wargeliso in ansixin noocaas ah aan loo baahnayn.
5. Ujeedooyinka Axdigan awgood, marka la xuso "muwaadin" (national) waxaa lagu wadaa qof dabiici ah (natural person) ama qof sharci ah (legal person).

Qodobka 28^{aad}: Khilaafaadka Ganacsiga Caalamiga ah ee u Dhexeeya Dhinacyada Gaar loo leeyahay

1. Hay'addu waxay bixin doontaa adeegyo dhexdhexaadin ah oo ku saabsan khilaafaadka ka dhasha ama ku saabsan xiriirrada ganacsi ee caalamiga ah ee u dhexeeya dhinacyo gaar loo leeyahay, iyadoo lagu saleynayo shuruudo uu ansixiyo Golaha Maamulka (Governing Council).

2. Khilaafaadka ka dhasha macaamil ganacsi oo uu mid ka mid ah dhinacyada gaar loo leeyahay ku galay ujeedooyin shakhsi, qoys, ama guri, laguma dari doono baaxadda Qodobkan.
3. Ujeedooyinka Axdigan awgood, marka la xuso “dhinac gaar loo leeyahay” (private party) waxaa loola jeedaa shakhsi keli ah ama hay’ad sharci ah oo lagu dhisay ama lagu habeeyey si waafaqsan sharciga khuseeya, ha ahaato mid faa’iido raadis ah ama aan ahayn, ha ahaato mid gaar loo leeyahay ama mid dawladeed, sida shirkad (corporation), wakaalad (trust), iskaashi (partnership), ganacsade keli ah (sole proprietorship), iskaashi wadajir ah (joint venture), urur kale (association), ama laan ka tirsan hay’ad noocaas ah.

Qodobka 29^{aad}: Bayaanno iyo Caddeyn

1. Dawlad kasta waxay, xilligii ay saxiixayso, ansixineyso, aqbaleyso ama ku biireyso Axdigan ama waqti kasta oo dambe, ogeysiin kartaa curraar (depository) nooca ama noocyada khilaafaadka lagu sheegay Qodobbada 25 iyo 27 ee aysan doonayn in ay u gudbiso Hay’adda. Curraar wuxuu si degdeg ah ugu gudbin doonaa ogeysiiskaas dhammaan Dawladaha Heshiiska ku jira.
2. Ogeysiiskaas ma noqonayo oggolaanshaha loo baahan yahay sida ku xusan faqradda 1 ee Qodobka 24, isla markaana waxba kama beddelo xaq Dawladaha Heshiiska ku jira ee ah inay khilaaf gaar ah u gudbiyaan Hay’adda iyagoo si gaar ah u oggolaanaya.
3. Ogeysiiskaas waa la beddeli karaa ama waa laga laaban karaa waqti kasta.

Cutubka Lixaad

Hab-raaca Dhexdhexaadinta (Mediation Procedure)

Qodobka 30^{aad}: Mabaadi’da Dhexdhexaadinta

Dhexdhexaadinta lagu qabto Axdigan hoostiisa waa in lagu fuliyaa si waafaqsan mabaadi’da iskaa-wax-u-qabso (voluntariness), dhexdhexaadnimo (impartiality), madax-bannaani (independence), daacadnimo (good faith), waxtar (efficiency), iyo kharash ku habboon (cost-effectiveness).

Qodobka 31^{aad}: Diiwaan-gelinta Kiisaska

1. Dhinacyada khilaafkooda doonaya in ay bilaabaan hab-raaca dhexdhexaadinta waa inay gudbiyaan codsi rasmi ah oo loo diro Xoghayaha Guud (Secretary-General) si waafaqsan xeerarka hab-raaca ee furitaanka hab-raacyada dhexdhexaadinta.
2. Xoghayaha Guud wuxuu diiwaan-gelin doonaa codsiga ilaa iyo inta uu si cad u ogaado in khilaafku si muuqata uga baxsan yahay baaxadda Axdigan, ama uu ku lug leeyahay Dawlad saddexaad oo aan weli bixinin oggolaansho hore. Xoghayaha Guud wuxuu si degdeg ah ugu wargelin doonaa dhinacyada diiwaan-gelinta ama diidmada diiwaan-gelinta.

Qodobka 32^{aad}: Habka Dhexdhexaadinta

1. Hab-raaca dhexdhexaadinta waxaa lagu fulin doonaa si waafaqsan qodobbada Axdigan iyo, marka laga reebo haddii dhinacyadu si kale u heshiiyaan, si waafaqsan xeerarka hab-raaca ee uu Golaha Maamulku ansixiyey ee ku saabsan habka dhexdhexaadinta.
2. Dhexdhexaadiyuhu waa inuu dhinacyada u muujiyo (disclose) wax kasta oo sababi kara khilaaf daneyn ah (conflict of interest).
3. Dhexdhexaadiyuhu waa inuu ilaaliyaa cadaaladda iyo sinnaan-daryeelka dhinacyada, wuxuuna kor u qaadaa in lagu gaaro heshiis nabadeed oo ku saabsan arrimaha khilaafka ah, si waafaqsan xeerka anshaxa ee dhexdhexaadiyeyaasha (code of conduct for mediators).

Qodobka 33^{aad}: Sirta iyo Qarsoodiga

Dhammaan macluumaadka la xiriira hab-raacyada dhexdhexaadinta ee lagu qabtay Axdigan iyo dhammaan dokumentiyada lagu sameeyo ama lagu helo inta lagu jiro hab-raacyadaas, waa in lagu hayaa sir (confidential), marka laga reebo haddii dhinacyadu si kale u heshiiyaan, macluumaadka ama dokumentigaas horey loo heli karo si guud ama haddii sharcigu waajib ka dhigo in xogta la muujiyo — marka laga reebo khilaafaadka lagu sheegay Qodobka 25.

Qodobka 34^{aad}: Isticmaalka Xogta Dhexdhexaadinta Caddeyn ahaan Hab-raacyo Kale

Haddii aan dhinacyadu si kale u heshiin, dhinacna xaq uma laha in uu hab-raacyo kale — ha ahaato garsoore hortiisa, hakam (arbitrator), ama maxkamad kale — ku adeegsado ama ku tiirsado aragtiyo,

hadallo, qirashooyin, ama soo jeedin heshiis oo uu bixiyey dhinac kale intii lagu jiray hab-raaca dhexdhexaadinta, ama warbixin ama talo soo jeedin uu bixiyey dhexdhexaadiyuhu.

Qodobka 35^{aad}: Xaddidaadaha Ku Saabsan Doorka Dhexdhexaadiyaha

Haddii aan dhinacyadu si kale u heshiin ama aan sharciga khuseeya waajibin, dhexdhexaadiyuhu ma qaban doono wax xil kale ah oo kasta, ha ahaado mid hadda socda ama mustaqbal ah, ha noqdo garsoor, hakam (arbitral), ama hab kale, oo la xiriira isla mawduuca khilaafka lagu dhexdhexaadinayo.

Qodobka 36^{aad}: Dhammaadka Dhexdhexaadinta

1. Dhexdhexaadintu way dhammaan doontaa:
 - a. Marka dhinacyadu ku soo gabagabeeyaan heshiis qoran oo daboolaya dhammaan ama qaar ka mid ah arrimaha khilaafka;
 - b. Iyadoo dhinac kasta uu mar kasta soo gudbin karo qoraal rasmi ah oo ku saabsan joojinta dhexdhexaadinta; ama
 - c. Hab kale ama duruufo kale oo dhinacyadu ku heshiiyaan ama lagu qeexay xeerarka khuseeya.
2. Marka dhexdhexaadintu dhammaato, waa in si degdeg ah Xoghayaha Guud (Secretary-General) loogu wargeliyaa in dhexdhexaadintu dhammaatay, taas oo uu sameeyo dhexdhexaadiyaha iyo/ama dhinacyada. Wargelintu waa inay tilmaanta taariikhda uu dhammaaday hab-raaca, in dhexdhexaadintu keentay heshiis iyo in kale, iyo haddii ay keentay, in heshiisku yahay mid dhammaystiran ama mid qeyb ah.

Qodobka 37^{aad}: Kharashaadka Hab-raaca

1. Lacagaha ay dhinacyadu ku bixiyaan adeegsiga adeegyada iyo goobaha dhexdhexaadinta ee Hay'adda waxaa go'aamin doona Xoghayaha Guud, si waafaqsan xeerarka iyo nidaamyada uu ansixiyey Golaha Maamulka (Governing Council).
2. Mushaharka iyo kharashaadka dhexdhexaadiyeyaasha waxaa lagu go'aamin doonaa xuduudo uu mar kasta dejiyo Golaha Maamulka.
3. Mushaharka iyo kharashaadka dhexdhexaadiyeyaasha, iyo sidoo kale lacagaha ku baxa adeegyada iyo goobaha dhexdhexaadinta ee Hay'adda, waxaa si siman u bixin doona dhinacyada, ilaa iyo inta si kale looga heshiin. Dhinac kasta wuxuu sidoo kale mas'uul ka noqon doonaa kharashaadka kale ee uu isagu gaar ahaan ku bixiyo hab-raaca.

Qodobka 38^{aad}: Xiriirka Dhexdhexaadinta iyo Hab-raacyada Kale ee Xallinta Khilaafaadka

1. Dhexdhexaadinta lagu fulinayo Axdigan waxay u furnaan doontaa dhinacyada waqti kasta, iyadoon loo eegin haddii hab-raacyo kale oo xallinta khilaafaadka ah hore loo bilaabay iyo in kale.
2. Dhexdhexaadintu way sii socon kartaa xilli ay socdaan hab-raacyo kale oo xallinta khilaafaadka ah, haddii dhinacyadu sidaas ku heshiiyaan.
3. Dhinacyadu waxay ku heshii karaan in, ilaa inta sharciga khuseeya oggol yahay, la hakiyo (suspend) socodka muddada xaddidaadda (limitation period) ee lagu dabaqi lahaa sharciga khuseeya ama qodob u dhigma, ee la xiriira khilaafka lagu dhexdhexaadinayo, laga bilaabo taariikhda ay dhexdhexaadintu bilowdo ilaa taariikhda ay dhammaato.
4. Dhexdhexaadinta lagu fuliyo Axdigan ma dhaawaceyso xuquuqda dhinacyada ee ah inay khilaafkooda ku xalliyaan hab kale oo sharci ah oo ay u hayaan.

**Cutubka Todobaad
Heshiisyada Xallinta (Settlement Agreements)**

Qodobka 39^{aad}: Soo Gabagabeynta Heshiisyada Xallinta

1. Marka dhinacyadu ku heshiiyaan shuruudaha heshiis lagu xallinayo dhammaan ama qeyb ka mid ah khilaafka iyadoo adeegsanaya dhexdhexaadintu lagu qabtay Axdigan, waa inay saxiixaan heshiiska xallinta ee ka dhashay dhexdhexaadinta (halkan iyo wixii ka dambeeya loogu yeerayo "heshiiska xallinta") qoraal ahaan, oo ay ku jiri karto qaab isgaarsiineed elektaroonig ah (electronic communications).
2. Heshiiska xallinta ee ay dhinacyadu saxiixeen waxaa xaqiijin doona (authenticated) Xoghayaha Guud (Secretary-General) si uu u caddeeyo in heshiiskaas uu ka dhashay dhexdhexaadintu lagu qabtay Axdigan, ilaa dhinacyadu si kale u heshiiyaan.

Qodobka 40^{aad}: Saameynta Sharci ee Heshiisyada Xallinta

1. Heshiis kasta oo si sharci ah loogu soo gabagabeeyey dhinacyada khilaafka waa mid waajib ku ah (binding) dhinacyadaas, waxaana laga doonayaa in ay si daacad ah u fuliyaan.
2. Marka ay dhinacyadu saxiixaan heshiiska xallinta, waxay oggolaadeen in heshiiskaas loo adeegsado caddayn ahaan si loo muujiyo in uu ka dhashay dhexdhexaadin, isla markaana lagu tiirsan karo marka la raadinayo gargaar sharci ah si waafaqsan sharciga khuseeya.
